



**Buugga Xeerka Nidaamka
ee Waaxda Booliiska Minneapolis**

Tirada:
10-200

Cadadda Tobnaad - Baaritaannada

Nidaamyada Baaritaanka

10-214 Isticmaalka DNR / Qalabka Dabin iyo Raac
(03/21/95) (11/06/07)

Dhammaan saraakiisha iyo baarayaasha u baahan inay haystaan Diiwaanka Nambarka La garaaco/DNR (qalinka diiwaanka) ama Qalabka dabinka iyo Raadraaca loo isticmaalo kheyraadka baaritaanka socda waa in ay ogeysiiyaan Qeybta Taageerada Farsamo ee Qeybta Dambiyada Abaabulan ujeedadooda ka hor inta aan la saxiixin amar maxkamadeed. Tani waxay u ogolaan doontaa shaqaalaha Qaybta Taageerada Farsamo inay helaan qalabka saxda ah ka hor inta aan la hawlgelin amarka maxkamada, waxayna u adeegi doontaa inay xafidaan diiwaanka cutubka lagu dalaci doono.

Kahor DNR (qalinka diiwaanka) ama amarka dabinka iyo raadraaca, sarkaalka/ baaraha waa in ay u yeedhaan shirkada telefoonka ee diiwaanka si loo hubiyo in shirkada saxda ah loogu adeego amarka dabinka iyo raadraaca.

Sarkaalka/baaraha ayaa u gudbin doona koobiga amarka maxkamada ee saxeexan qaybta Taageerada Farsamada ka hor inta aan la rakibin DNR (qalinka diiwaanka) ama dabinka iyo Raadka.

Marka lala xiriiro ka dib, Qeybta Taageerada Farsamada ayaa siin doonta sarkaalka/baaraha warbixinaha la codsaday.